

# **Tababar weyn oo melateri oo Västerås ka dhacaya Sebteembar gudeheeda**

**Sebteembar gudeheeda waxaa dhacaya tababar weyn oo melateri oo saameyn ku yeelanaya isu socodka gaadiidka Västerås iyo maritaanka waddooyinka aaggeenna ah. Tababarka Aurora 17 waa tababarka ugu weyn ee melateri ee nuuciisa ah in ka badan 20 sano.**

Qeybaha xoogagga difaaca oo dhan iyo in ka badan 19 000 oo rag iyo dumar ah ayaa ka qeyb gelaya. Tababarka waxaa sidoo kale qeyb ka ah hey'ado dowladeed oo tiro badan iyo waddamo kale. Guddiga maamul gobaleedka gobalka Västmanland iyo laacibiin fara badan oo ku jira U-Sam (iskaashiga u diyaar garowga xaaladaha adag ee gobalka U) ayaaad ka mid ah.

## **Goormuu tababarku dhacayaa?**

Tababarku wuxuu soconayaa inta u dhexeysa 11 iyo 29 Sebteembar. Isu socodka gaadiidka ee Västmanland waxaa inta ugu badan saameyn lagu yeelanayaa inta u dhexeysa isniinta 18 Sebteembar iyo arbacada 27 Sebteembar.

## **Sidee ay reer Västerås ku dareemi doonaan tababarka?**

Muwaadiniintu waxay tababarka Aurora 17 ku dareemi doonaan siyaabo kala duduwan. Ka hor, inta lagu jiro iyo tababarka ka bacda intaba waxaa dhici doona wax daabulid fara badan si gaadiidka meleteriga iyo shaqaaluhu ay u joogaan meesha looga baahanyahay. Waxaa wax lagu daabuli doonaa diyaarado, maraakiib, waddooyinka miyiga mara iyo waddooyinka tareennada.

## **Sidee uu tababarku noogu saameynayaa annaga Västerås gudeheeda?**

Mälardalen oo dhan waa laga dareemi doonaa tababarka Aurora 17. Västmanland gudeheeda waxay arrintu khuseyn doontaa gaadiid aad u fara badan. Isu socodka gaadiidka waxaa inta ugu badan saameyn lagu yeelanayaa inta u dhexeysa isniinta 18 Sebteembar iyo arbacada 27 Sebteembar.

## **Xaggee daabulidda laga dareemi doonaa?**

Guutada aagga Västerås/Sala waxay sida ugu muhiimsan maareyn doontaa adeegga lojiistikada waxay isugu i-imaanayaan hareeraha galbeed ee Västerås (Hässlö – Irsta), woqooyiga Västerås (oo ay Hökåsen ka mid tahay), Sala (aagagga macdanta laga qodo) iyo Saladamm. Waxyaabaha lojiistikada loo adeegsanayo waxaa inta ugu badan laga billaabo 18 Sebteembar ilaa iyo 22 Sebteembar lagu soo daabulayaa E18, E18-kii hore iyo waddada weyn ee 70 laakiin xitaa shabakadaha waddooyinka yar-yar ee isku xira waddooyinka waaweyn.

Daad gureynta guutada melateri ee laga soo daad gureynayo aagga tababarka Enköping loona soo daad gureynayo koonfurta Mälaren waxay dhaceysaa maalmaha fasaxa usbuuca ee 23 Sebteembar ilaa iyo 25 Sebteembar iyadoo leh isu socod gaadiid oo fara badan oo dhex maraya Enköping.

Aagagga ay wuxu saameynayaan ugu horreynta waa waddada weyn ee 55 (Enköping - Strängnäs) iyo xaggaas iyo waddada weyn ee 56 (Västerås - Eskilstuna). (Meesha waxa laga soo qaatay:

<http://www.forsvarsmakten.se/sv/var-verksamhet/ovningar/aurora-17/har-ovar-vi/>)

## **Xaggee tababarka lagu fulinayaa?**

Meelaha tababarka ee ugu waaweyn waxay noqon doonaan Mälardalen iyo Stockholm, daafaha iyo dacallada Gotland iyo Göteborg. Xoogagga difaacu waxay isticmaali doonaan dhul ku yaalla meelo ka baxsan fagaarooyinkooda tababarka- iyo wax genidda. Aagaggaas si gaar ah ayaa loo wargelinayaa milkiila yaasha dhulka iyo deegaanka. Tababarka waxaa lagu fulinayaa hawada, dhulka iyo badda. Guutooyinka Swiidhan oo dhan wuxu wey saameynayaa.

### **Xaggeen ka helaa warbixin dheeraad ah oo ku aaddan Aurora 17?**

Macluumaad dheeraad ah oo ku aaddan bogga intarneetka ee Guddiga maamul gobaleedka:

<http://www.lansstyrelsen.se/Vastmanland/Sv/manniska-och-samhalle/krisberedskap/Pages/forsvarsmaktsovning-aurora-17.aspx>

Macluumaad dheeraad ah, filin iyo su'aalo iyo jawaabo waxay ku jiraan barta intarneetka ee Xoogagga difaaca: <http://www.forsvarsmakten.se/sv/var-verksamhet/ovningar/aurora-17/>